

# Caawinaad Weydiisashada Wakiilka

Haddii aad isku dayday xulashooyinka adeegga dadweynaha USCIS laakiin aad walii ubaahantahay caawinaada xalinta dhibaataada iyadoo la isticmaalayo codsi ama arji, waxaad weydiinsan kartaa wakiilka caawinta adoo qaadaaya talaabooyinka soo socda:

## TALAABADA 1

Soo gudbi codsiga onleenka ah ama Buuxi Foomka DHS-7001(Foomka Caawinta Kiiska), oo laga helayo [www.dhs.gov/cisombudsman](http://www.dhs.gov/cisombudsman), si loogu wakiilka oggolaado inuu USCIS a wadaago macluumaadkaaga qarsoodiga ah.

## TALAABADA 2

Ku dar dhammaan lambarrada rasiidka USCIS ee foomamka la xiriira dalabkaaga ama codsigaaga ee Foomka DHS-7001 ama foomka onleenka ah, oo koobi/nugul ka samee macluumaadka iyo dukumiintiyada muhiimka ah, sida:

- Waraaqaha ee aad u gudbisay USCIS;
- Dukumentiyada aad ka heshay USCIS; iyo
- Macluumaadka kale ama dukumiintiyada aad u malaysid inay muhiim u yihiin arjigaaga ama codsigaaga.

Fadlan ha dirin dukumiintiyada asalka ah.

## TALAABADA 3

Ugusoo gudbi codsigaaga onlaynka ama ugu dir foomka saxeezan ee DHS-7001 oo wixii macluumaad dheeri ah wakiilka mid ka mid ah kuwan soo socda:

IMAYL: [cisombudsman@hq.dhs.gov](mailto:cisombudsman@hq.dhs.gov) (Lagu taliyay)  
FAKIS: 202-357-0042  
Boostada: Department of Homeland Security  
Citizenship and Immigration Services  
Ombudsman  
Attention: Case Assistance  
Mail Stop 0180  
Washington, D.C. 20528

\* Sababo la xiriira sugitaanka amniga nidaamka boosta ee dowladda , kiisaska boostada lagu soo diro (xitaa kuwa lagu soo diro boostada degdegga ah) ayaa dib loo dhigi karaa illaa 14 maalmood.

Dhammaan macluumaadka wakiilka loo soo gudbiyo waa la ururiyaa oo la ilaaliyaa iyada oo la raacayo qodobbada Sharciga Asturnaanta.

## Xiriirka

Wakiilka Adeegyada Muwaadinimadda iyo Socdaalka

Department of Homeland Security  
Mail Stop 0180  
Washington, D.C. 20528

202-357-8100  
202-357-0042 (fakis)  
1-855-882-8100

[cisombudsman@hq.dhs.gov](mailto:cisombudsman@hq.dhs.gov)

[www.dhs.gov/cisombudsman](http://www.dhs.gov/cisombudsman)



Adeegyada  
Muwaadinimadda iyo  
Socdaalka

# Wakiilka

Sida Wakiilka Adeegyada  
Muwaadinimada iyo  
Socdaalka uu kuu shaqeeyaa



Homeland  
Security

# Halkan ujooga inuu ku Caawiyo

Wakiilku wuxuu halkan u joogaa inuu caawiyo shaqsiyaadka iyo loo shaqeeyayaasha u baahan inay xaliyaan dhibaato ku saabsan Adeegyada Muwaadinimadda iyo Socdaalka ee Mareykanka (USCIS). Wakiilka ayaa sidoo kale soo jeediya talooyin si loo xaliyo dhibaatooyinka nidaamyada iyo hagaajinta tayada adeegyada ay bixiso USCIS.

Wakiilku waa awood madaxbanaan, sir ah, iyo eex la'aan ah.



Wakiilku wuxuu u adeegaa dadweynaha. Ma jiro wax lacag ah oo laga qaadayo gargaarka uu bixiyo Wakiilka. Asturnaan, iyo kheyraad aan eex lahayn.

## Wakiilka ayaa ku caawin kara hadii:

- Aad wajaheysid xaalad deg-deg ah ama dhibaato ah oo ay sababtay gef, qalad, ama daahitaan xaa USCIS.
- Aad dhibaato kala kulantay arjigaaga ama codsashadaada oo aadan awoodin inaad ku xaliso USCIS.
- Arjigaada ama codsigagu wuxuu sugaya wixii ka dambeeya waqtiga USCIS ee la soo dhejiyay (waxaad celcelis ahaan waqtiyada ka shaqeynta ka heli kartaa [www.uscis.gov](http://www.uscis.gov)).
- Waxaad rumeysan tahay in USCIS ay qalad ku sameysay howsha arjigaada ama codsigaaga.

## Wakiilka kuma caawin karo hadii:

- Aad raadineyo talo sharciyeed. Wakiilku ma bixiyo talo sharciyeed.
- Aad raadineyso kaalmo arin aan lug ku laheyn USCIS. Awooda Wakiilka waxayku xadidan yahay caawinta dhibaatooyinka la xiriira codsiyada USCIS, codsiyada, ama adeegyada.
- Adiga aan ku raacsanayn go'aanka ay sameysay USCIS laakiin ma tilmaami kartid khalad ama qalad nidaamka ku jira. Iyada oo Wakiilku uu ka shaqeynayo inuu wax ka qabto gefafka iyo khaladaadka ka dhaca USCIS, Wakiilku ma wareejin karo ama ma beddeli karo go'aannada USCIS.

## Caawinta Kiiska

Helitaanka Caawinaada aad Ugu Baahan Tahay Codsiga ama Arjiga USCIS ee Wali Socda.

Haddii aad dhibaato ku qabtid arjigaada ama codsashadaada USCIS, Wakiilka ayaa laga yaabaa inuu ku caawiyo. Wakiilka wuxuu USCIS siiyaa aragti dhexdhexaad ah oo madaxbannaan isku day lagu xaliyo dhibaatooyinka. Kahor intaadan I Wakiilka caawimaad kala xiriirin, marka hore isku day inaad xaliso dhibaataadaada adoo adeegsanaya xulashooyinka adeegga dadweynaha ee USCIS ee kuu furan adiga:

- Ka wac Xarunta Adeegga Macaamiisha ee USCIS 1-800-375-5283.
- Onlaynka ka fiiri Xaaladda Kiiskayga bartra internetka ee ah [www.uscis.gov](http://www.uscis.gov)
- Ka Sameeyso Ballanta INFOPASS adigoo gallaayo barta USCIS ee <http://infopass.uscis.gov>.

## Su'aashaada: Nidaamkeena

Mar hadii Xafiiska Wakiilka helo codsi caawimaad ah, waxaan:

- Dib u eegaynaa macluumaadka si loo hubiyo inaan awoodno inaan kaa caawino xaaladdaada;
- Daraasad ku samee xaaladda arrinta; iyo
- Haddii aan kaa caawin karno, la xiriirka USCIS aangoo ku matalaya adiga oo leh talooyin madax-bannaan oo ku saabsan sida loo xalliyo dhibaataada.

## Xaqiijinta in Codkaaga La Maqlo

Wajibbaadka Wakiilka oo ah inuu ku taliyo Dariiqooyinka lagu Hagaajinayo Adeegyada Muwaadinimadda iyo Socdaalka

Caawinta dadka xalinta dhibaatooyinka arjiyada iyo codsiyada ka sokow, Wakiilka ayaa sidoo kale soo jeedinaya qaabab loo xaliyo dhibaatooyinka nidaamyada ee shaqsiyaadka iyo loo shaqeeyaha ay wajahayaan goorta ay adeegyada ka raadinayaan USCIS. Waxaan ka warqabnaa arrimaha noocan ah ee nidaamyada ah annagoo u maraya:

- Cabashooyinka shaqsiyeed iyo codsiyada caawinta;
- Macluumaadka iyo weydiimaha aan ka helno ururada aan dowliga ahayn iyo saraakiisha dowladda, oo ay ku jiraan USCIS; iyo
- Isdhexgalkeena shaqsiyadeed iyo kulamada aan la leenahay codsadaayaasha, codsadaayaasha, loo shaqeeyaha, ururada samafalka oo ay kujiraan ururada bulshada iyo diinta ku saleysan, iyo xirfadlayaasha socdaalka ee wadanka.

Wakiilka waxaa ka go'an inuu saameyn ku yeesho isbedel wanaagsan si dhammaan dadka iyo ganacsatada USCIS adeegyada ka raadinayaan ay uhelaan adeeg macmiil tayo sare leh iyo go'aamada.

Waxyaabaha aad soo gudbiso ayaa kicinaya shaqada Wakiilka. Fadlan nala wadaag khibradahaaga iyo soojeedintaada [cisombudsman@hq.dhs.gov](mailto:cisombudsman@hq.dhs.gov).